

# Xaqiiqada Xayiraadda COVID-19

## Maxaa Ku Cusub Guri Joogga Amarka Ontario?

Januray 14, 2021, Ontario waxay gashay xaalad deg deg ah cudurka COVID-19 dartiis. Waxay soconeysaa ugu yaraan ilaa iyo February 11, 2021. Dawladu waxay ku talineysaa in arrimo muhiim ah oo keliya aad gurigaada uga baxdo, sida:

- aadidda dugsiga iyo xannaanada carruurta
- aadidda shaqada (haddii aadan guriga ku qaban karin)
- jimicsi iyo socodsiinta eyga
- gadashada cuntada, daawada iyo waxyaabaha guriga muhiimka u ah
- raadsashada adeegyada dawladda, caafimaadka, sharciga iyo maaliyadda

Maaskaro waa in aad xirataa haddii aad ka baxdo gurigaaga. Waa in aad ilaalisaa kala fogaanshada bulshada 5 qof oo keliya ayaa bannaanka ku kulmi karta.

Qoyska isku guri ku nool oo keliya ayaa loo oggol yahay in ay isku soo dhawaadaan. Haddii aad tahay waalid keligiis ah ama aad keligaa guri ku nooshahay waad isku soo dhawaan kartaan.

## Yaa fulinaya awaamirta xayiraadda? Ciqaabtuse maxay tahay?

Fulinta waxaa loo igmaday saraakiisha sharciga dawladda hoose, boliiska gaarka ah iyo kuwa caadiga ah. Haddii aad jebiso amarka xayiraadda, waxaad muteysaneysaa 750 doollar oo ganaax ah. Haddii aad is hortaag ku sameyso dadka ama shaqaalaha ama boliiska, ganaaxaadu wuxuu noqonayaa 1,000 doollar.

## Boliiska ama saraakiisha fulinta jidka ma igu joogin karaan?

Dawladda Ontario iyo af-hayeennada boliiska waxay qabaan in amarka joogitaanka guriga uusan boliiska awood u siineynin in si aan kala sooc lahayn ay dariiqyada dadka ugu joojiyaan. Waxay kaloo leeyihiin bannaan u bixitaanka oo keliya in aysan caddeyn u noqon karin in aad ku xad gudubtay amarka joogitaanka guriga.

Waxaa kaloo caddaaladda Ontario ku maldahan cunsuriyad nidaamsan. Saraakiisha fulinta sharciga waxay si aan isu dheelli tirneyn u ugaarsadaan madowga, dadka isir ahaan Kanada u dhashay (indigenous), kuwa la midab takooro iyo muhaajiriinta.

In kastoo amarka xayiraadda Ontario uusan qeexeenin in si aan kala sooc lahayn la isku joojiyo, haddana saraakiisha fulinta waxaa loo banneeyay in si macquul ah ay kuu joojin karaan. Sidaas darted, boliisku waxay tuhun xad gudub ah kuugu joojin karaan dariiqda.



## **Maxaan sameyn karaa haddii boliisku ama saraakiisha fulintu ay i weydiyaan su'aalo? Ma in aan is sheegaa haddii ay dacwad igu oogaan?**

- Haddii sarkaal boliis ah uu si macquul ah uga shakiyo in aad ku xad gudubtay amarka xayiraadda, wuxuu ku weydiin karaa aqoonsigaada. Tusaale ahaan, haddii koox dibadda joogta aysn dhowreynin kala fogaanshada bulshada ama tirada kooxdu ay ka badan yihiin 5 qof.
- Si aad u yareyso fursadda joojinta, isticmaal maskaro, ilaali kala fogaanshaha, iskana jir in aad la joogto koox ka badan 5 qof.
- Amarka guri joogga, wuxuu sababayaa in aad boliiska u sheegto magacaada saxda ah, taariikhda dhalashada iyo cinwaanka aad deggan tahay. Haddii aad boliiska u diiddo aqoonsigaada, waxaa lagugu eedeyn karaa is hor tag.
- Haddii lagu weydiyo aqoonsigaada, waad sheegi kartaa. Amarka guuri joogga, khasab kama dhigayo in aad haysato aqoonsi ay dawladdu bixisay.
- Sidoo kale, amarka guri joogga kuguma khasbayo in aad haysato warqad shaqo oo caddeyneysa in aad tahay shaqaale muhiim ah oo u socda goobta shaqadiisa. Hase yeeshee, si aad u nabad gasho, waxaa kuu habboon in aad haysato warqaddaas. Haddii aad rabto, weydiiso shirkadda aad u shaqeyso warqaddaas shaqada.
- Haddii lagu joojiyo, waxaad xaq u leedahay in boliiska aad weydiiso sharciga uu maleynayo in aad jebisay.
- Haddii aad is caddeyso, isla markaana boliisku uusan kugu eedeynin in aad sharciga jebisay, waxaad xaq u leedahay in aad iska aamusto. Ha ka jawaabin su'aal loo isticmaali karo in ay dureyso shaqsiyaddaada.
- Boliiska waxaad weydiin kartaa: ma la i xirayaa, mise waa iska bixi karaa? Haddii ku yiraahdaan lagu xiri maayo, waad iska baxaysaa. Ma tegi kartid ilaa iyo aad ka jawaabto su'aalaha oo idil.
- Guud ahaan, boliiska keliya ayaa awood u leh in ay ku xiraan haddii ay haystaan sabab la taaban karo oo macquul u ah. In aadan is caddeyn, ma sababi karto in lagu xiro, hase yeeshee waa lagu ganaaxi karaa.
- Saraakiisha kale ee fulinta awood uma laha in ay ku xiraan. Hase yeeshee, waxay boliiska iyo hay'adda xudduudka Kanada u gudbin karaan warbixintaada.
- Haddii aad ka cabsi qabto in lagu xiro, diyaarso qorshe nabadeed. Tusaale ahaan:
  - Wac qof aad kalsooni ku qabto oo la xiriira Qareenkaada ama qoyskaada ama shaqadaada ama uu isagu ku damiinan karo. Xitaa tixgeli in uu hayo fruraha gurigaaga iyo dukumeenti muhiim kuu ah.
  - Ka fakar qof ku taageeri kara, sida saaxiib, xubin qoys ama bulshada.